



SHARCIYADA AMAAHDA MAKTABADA ESKILSTUNA

KAARKA AMAAHDA (Lånekort)

Waxad u baahan tahay kaarka amaahda si aad maktabada wax uga amaahato. Kaarka amaahda waa bilaash, kaliya waxad u bahaantahay in aad wadatit kaarkaaga aqoonsiga (legitimation) Hadii aad ka yar tahay 18 sano, kaarka waxa ku sameyn kara waalidkaaga. Sido kale waxaa lagu siindonaa 4 lambar oo sir ah, kuwaas oo aad isticmaali karto marka aad amaahaneyso buugaagta, adigo isticmaalayo mashiinka wax amaahinta.

WAKHTIGA AMAAHDA (Lånetid)

Wakhtiga amaahda ee buugaata waa afar 4 asbuuc. Hadii aadan ka gaarin in aad buuga oo dhan aad akhrisid 4 asbuuc oo uu wakhtiga amaahda ka dhamaado, waxaad amaahan kartaa buugaas mar labaad, waxa shardi ah in uusan qof kale ku jirin safka oo doonayo in uu amaahdo buugas. Filimada, Jaraaidka ,wargeysyada, iyo Cajaladaha ciyaarta waxa la amaahdaa wakhti kooban.

MAR KALE AMAAHO ADIGOO JOOGO GURIGAAGA (Internetkatalog)

Mar labaad ayaad amaahan karta adigo joogo guriga adigo isticmalaayo websetka www.eskilstuna.se/biblioteket iyo 4 lanbar sirta ah.

IN AAD DALBATID BUUGA AAD RABTO (Beställa böcker)

Buuga aad dooneysid waad sii dalban kartaa si Markii buuga la soo celiyo aan ku dhigno buugaas. Waxa lagu soo dirayaa fariin sheegeyso in uu buugii la keenay. Waraaqda waxa kale oo ku qoran wakhtiga ugu dambeyn aad so qaadan kartid buugas.

KA TAXDIR KARKAAGA!

Hadii uu kaa lumo kaarka amaahda, waxa khasab ah in aad u sheegtid shaqaalaha Maktabada Si aan u joojino, si uusan qof kale ugu amaahan kaarka kaa lumay.

SOO CELI WAXI AAD AMAAHATO WAQTIGA LOOGU TALAY GALAY

Hadii aadan soo celin ama so daahiso waxii aad amaahato waxad bixineysaa lacag ganaax ah waxan ku soo direynaa fariin e-mailka iyo taleefonka gacanta. Fariinta waxa ku so direynaa 3 bari ka hor inta uusan ka dhicin waqtiga. Hadii lagugu leeyaay deyn gaarayso 100kr ama lacag ka badan, laguma ogolaan doono in aad ka amaahatid buug kale maktabada intii aad ka bixineysid deyntas.

Mahadsanid.